

Oktoobar 01, 2022

## **Bisha Hiddaha Islaamka: Wasiir Kuxigeenka Yaasiin**

Wasiirka Kuxigeenka Socdaalka iyo Dhaqamada Kaladuwan, Maxamed Yaasiin ayaa soo saaray bayaankan soo socda oo ku saabsan Bisha Hiddaha Islaamka:

"Bisha Hiddaha Islaamka waa wakhti lagu xuso taariikhda hodanka ah iyo kuwa kaladuwan ee caqiidada Islaamka ee Alberta iyo aduunka oo dhan.

"Muslimiinta waxay Alberta ugu yeeren gurigooda tan iyo ka hor intaan noqon gobol. Wuxaad welii ka heli kartaa masaajidkii ugu horreeyay ee Kanada, Masjidka Al Rashid, Edmonton ka dib 84 sano.

Bulshada Muslimka ah ee Alberta waxay sii wadaa inay koraan, koraan oo ay wax ku biiriyaan gobolkeena.

"Waan ku faraxsanahay inaan ku noolaado gobol taageera xorriyadda qof walba si uu ugu dabaaldego oo uu ugu dhaqmo dhaqankooda si furan. Waa inaan sii wadnaa oo ka hortagno nacaybka loo qabo Muslimiinta ama kuwa kale sababtoo ah caqiidadooda ama asalka dhaqankooda. Iyada oo loo marayo Qorshaha Waxqabadka Kahortagga Cunsurinimada ee Alberta (Alberta's Anti-Racism Action Plan) iyo hindisayaashayada kale, asxaabta dawladda iyo aniga waxaan sii wadeynaa inaan ka shaqeyno ciribirkira cunsuriyadda gobolkayaga. Wuxaan ku hanweynahay inaan horumarino dhaqamada kaladuwan iyo kala duwanaanta, waxaanan soo dhawaynaynaa wax kusoo biirinta dhammaan dadka cusub ee Alberta.

"Dhammaan bisha Oktoobar, waxaan Alberta ku dhiirigelinaya inay ka soo qaybgalaan munaasabada bulshada oo ay la wadaagaan xiisaha ay u qabaan deriskeenna Muslimka ah, markay ogaadaan oo ay qadariyaan Hiddaha Islaamka ee Alberta ee kaladuwan."